Faallo Qoto-dheer: SDP.F20.01

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

02 Sebteembar 2022

Soo nooleynta wada-xaajoodka arrimaha siyaasadda ee la isku hayo

Talooyin muhiim ah oo tixgelin mudan

Somali Public Agenda

Hordhac

Tobankii sano ee la soo dhaafay, horumarro la taaban karo ayaa laga sameeyay xaaladda siyaasadda Soomaaliya, oo ay kamid tahay dhismihii Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanadkii 2012 kadib markii la ansixiyay Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka ah. Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ayaa la dhisay wixii ka dambeeyay sanadkii 2013 waxaana xigay dib-u-habeyno kala duwan oo muhiim ah oo hay'adaha dowladda lagu sameeyay. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jira dhowr cilladood marka la eego xaaladda siyaasadda Soomaaliya oo keenay in ay adkaato in horumar joogto ah la sameeyo. Tusaale ahaan, waxaa jira khilaaf joogto ah oo ka jira federaaleynta Soomaaliya, qaab-dhismeedka ciidamada amniga dalka iyo doorka doorashooyinka dimuqraadiga ah ku leeyihiin tartanka furan ee siyaasadeed eek u dhaca si nabdoon.

Lagasoo bilaabo sanadkii 2012, liidnaanta heshiiska siyaasadeed ayaa gacan ka geysatay in ay dhacaan xasillooni darro iyo iskahorimaad rabshado wata. Tani waxay caqabad ku noqotay horumarkii laga gaari lahaa yoolalka horumarineed iyo dowladnimo ee muhiimka ah. Inkastoo la wada ogsoon yahay muhiimadda ay leedahay wax ka qabashada arrimahan wiiqaya dowladnimada, haddana wada-xaajood macno leh oo wax lagaga qabanaayo arrinkan weli ma billaaban. Arrintan ayaa waxaa sabab u ah dhowr arrimood, balse sababta ugu weyn waa is-aaminaad la'aanta ka dhex jirta qeybaha kala duwan ee siyaasadda iyo bulshada kadib tobannaan sano oo colaado ah, iyo isla xisaabtan la'aan taasoo ka weecineysa siyaasiyiinta inay ka shaqeeyaan danta guud ee qaranka.

Bilowga muddo-xileedka siyaasadeed ee cusub waxa ay fursad cusub u siinaysaa Soomaalida si ay wax uga qabtaan arrimaha la isku hayo ee caqabadda ku ah dhabihii uu dalku u mari lahaa mustaqbal xasiloon oo barwaaqo ah. Tani waxaa lagusii dhisi kartaa shirkii guusha ku dhamaaday ee u dhexeeyay madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ee soo dhamaaday 12-kii June, kaasoo dhacay muddo yar kadib markii la doortay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud. Heshiis siyaasadeed waxa lagu gaari karaa dib usoo nooleynta wada-xaajoodka, tayeynta hay'adaha si ay wada-xaajood siyaasadeed oo wax-ku-ool ah oo loo dhan yahay u galaan. Warbixintan waxay qeexeysaa dhowr xulasho oo lagu taageerayo ujeedooyinkan, oo ay ku jiraan tixgelinta sida loo qaabeeyn karo wada-xaajood wax-ku-ool ah, iyo sidoo kale qeexitaan mowduucyada muhiimka ah ee diiradda lagu saarayo wadahadalka.

Warbixintan waxa falanqeynta ku qoran lagasoo qaatay doodo taxane ahaa oo ay soo qabanqaabisay Madasha Wadahadallada Soomaaliyeed (Somali Dialogue Platform) lagasoo billaabo bishii Ogosto 2021 oo ay kasoo qeyb galeen dad badan oo Soomaaliyeed. Wadahadalladaas muddada ay socdeen, Madasha Wadahadallada Soomaaliyeed waxa ay fududeysay doodo ballaaran oo ku saabsan arrimaha la isku hayo ee la xiriira jaangoynta siyaasadda Soomaaliya iyo xalalka suurtagalka ah. Doodaha tixanaha ahaa waxaa lagusoo gebagabeeyay kulan ka dhacay Muqdisho kaasoo lagusoo bandhigay qoraalladii la qoray loogana dooday. Warbixintan waxa ay soo koobeysaa arrimihii laga wada hadlay iyo sidii wax looga qaban lahaa inta lagu jiro middo-xileedka siyaasadeed ee dowladda cusub ee federaalka.

Naqshadeynta qaab-dhismeed loo dhan yahay ee wada-xaajoodka

Sameynta qaab-dhismeedka wada-xaajoodka loo dhan yahay, oo ay qeyb ka yihiin jilayaal kala duwan, loona qaabeeyo arrimaha sida ay mudnaanta u kala leeyihiin, ayaa noqon karta hab wax-ku-ool ah oo heshiis looga gaaro qaar kamid ah arrimaha ugu waaweyn ee la isku hayo ee Soomaaliya. Qeybtan waxa ay sharraxeysaa sida qaab-dhismeedka noocan oo kale ah loo habeyn karo iyo mabaadi'da ay tahay in ay hagaan hannaankan.

Qaab-dhismeedka

Waxa jira dhowr xulasho oo ku saabsan sida wada-xaajoodka iyo wadahadalka loo qaabeyn karo. Waxaa loo baahan doonaa in go'aan laga gaaro sida madaxda siyaasadda Soomaaliya ay uga qeyb qaadan lahaayeen, qaab-dhismeedka guddiga mas'uulka ka noqon doona howlaha maalinlaha ah (iyo sida xubnaha guddigan loosoo xulayo loona maamulayo), iyo sida aragtida iyo codka dadweynaha Soomaaliyeed loogu biirin karo doodaha. Qaar kamid ah xulashooyinka ayaa halkan lagu falanqeynayaa.

Golaha Wadatashiga Qaran: GWQ wuxuu ka koobnaanayaa Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha Dowladda Federaalka, guddoomiyeyaasha labada gole ee Baarlamaanka Federaalka, Madaxweynayaasha Dowlad-goboleedyada iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir. Haddii la dhiso xisbiyada siyaasadda, waxaa sidoo kale lagu dari karaa hoggaamiyeyaasha xisbiyada waaweyn ee buuxiya shuruudaha xisbinimada. Golaha Wadatashiga Qaran ee uu guddoomiyo Madaxweynaha ayaa noqonaya madasha ugu sarreysa ee go'aan qaadashada, dejinta mudnaan wadajirka ah iyo jadwalka xallinta arrimaha la isku hayo. GWQ waxa uu kulmayaa ugu yaraan saddexdii biloodba mar, iyadoo goobta kulanka lagu qabanayo la wareejinayo (marba goob cusub).

Xogheynta GWQ: Xogheyntu waxay qaban doontaa hawsha diyaarinta iyo maareynta muhiimka ah, abaabulka shirarka GWQ, diyaarinta iyo wargelinta madaxda, iyo maareynta ajendayaasha iyo qaababka loo galayo doodaha. Xulashooyinka lagu dhisayo xogheynta waxaa kamid noqon kara:

- In uu Xoghaynta ka hoos shaqeyso Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyadoo Ra'iisul Wasaaruhu uu noqonayo Guddoomiye ku xigeenka GWQ. Ugu yaraan muddada dhaw, tani waxay noqon kartaa habka ugu waxtarka badan uguna kharashka yar, inkastoo ay sidoo kale awoodda Golaha Wadatashiga Qaran ku badineyso Dowladda Federaalka. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxaa loo xilsaari karaa inuu xilka xogheynta ku wareejiyo xafiis kale muddo cayiman gudaheed.

- Dhisidda xogheyn ka kooban xubno ay soo magacaabeen oo metelaya dhammaan xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran, iyadoo GWQ loo magacaabayo guddoomiye wareega kadib kulan kasta oo GWQ ah. Tani waxay keeni kartaa tageero siyaasadeed oo weyn iyo dhexdhexaadnimo laakiin waxay sidoo kale carqaladeyn kartaa waxtarka waxayna ka dhigi kartaa Xogheynta iyo GWQ kuwo u nugul kala aragti duwanaan siyaasadeed.

- Dhisidda Guddiga Xiriirka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada sida uu dhigayo Qodobka 111F ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 iyo u xil-saaridda guddigaas ee howlaha Xogheynta. Tani waxay siinaysaa xoghaynta saldhig sharci oo cad, laakiin waxay sidoo kale u badan tahay inay

qaadato wakhti in la dhiso, waxaana laga yaabaa in aanu guddigaas helin miisaan siyaasadeed oo ku filan.

Kooxo Ka Shaqeeya Arrimaha Gaarka ah: Arrimo kala duwan ayaa u baahan doona inay doodo ka yeeshaan hay'adaha ay khusayso iyo khubarada farsamo. Xogheynta Golaha Wadatashiga Qaran waxay isku dubaridi doontaa kooxahan, kuwaasoo loo xilsaari doono inay qabtaan doodo soona uruuriyaan xulashooyinka/talooyinka si looga doodo shirarka Golaha Wadatashiga Qaran. Waxa uu hannaankan suuragelinayaa in arrimo badan si is barbar socda looga shaqeeyo. Kooxaha ka shaqeynaya arrimaha gaarka ah, ee uu magacaabayo Xogheynta kadib oggolaanshaha GWQ, waxaa ku jiri kara wakiillo ka socda wasaaradaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada, guddiyada madaxa bannaan, guddiyada baarlamaanka, hay'adaha tacliinta iyo cilmibaarista, iyo ururada bulshada rayidka ah. Kooxaha shaqada waxaa loo abaabuli karaa iyadoo loo eegayo afarta arrimood ee lagu muransan yahay ee lagu qeexay qeybta 3-aad.

La-tashi dadweyne: La-tashiga iyo dhageysiga daneeyeyaal ballaaran oo ka baxsan hay'adaha dowladda, iyo dhageysiga aragtiyo kala duwan oo talo ku biiriya hannaanka wada-xaajoodka waxay xoojin doontaa fursadaha guusha, waxayna kordhin doontaa sharciyadda arrimaha lagu hesiiyo. Xogheynta Golaha Wadatashiga Qaran, oo ay wehliyaan kooxaha ka shaqeynaya arrimaha gaarka ah, ayaa loo xilsaari karaa abaabulka kulamada dadweynaha, iyo dii-waangelinta doodaha iyo talooyinka ay soo jeediyaan ka qeybgalayaasha kulamadan. La tashiyada noocan oo kale ah waxaa sidoo kale lagu qaban karaa madallo kala duwan oo warbaahineed.

Mabaadii'da wadahadalka

Warbixintan waxay soo jeedinaysaa lix mabda'a oo kala duwan in qaab-dhismeedka wada-xaajoodka loo dhan yahay lagu saleeyo. Mabaadii'dan waxaa lasoo jeediyey kadib markii la qiimeeyay cilladihii wada-xaajoodyadii hore.

1. **Xallinta cabashooyinka iyo dib-u-dhiska kalsoonida**: Si dib loogusoo celiyo kalsoonida jilayaasha siyaasadda, waa in la helaa fursad iyo waqti ku filan oo lagu xalliyo tabashooyinkii hore. Is-waafajinta hannaanka wadahadalka iyo Hannaanka Dib-u-heshiisiinta Qaranka, u weecinta doodaha goobo ka baxsan kulamada madaxda si looga qeyb geliyo jilayaal ballaaran, iyo ku lug lahaanshaha dhaqanka Soomaalida si loo caddeeyo qiyamka la wadaago waxay sii xoojin kartaa fursadaha guusha.

2. **Lahaanshaha Soomaalida**: Iyadoo la hakinayo hindisayaashii hore, geeddi-socodka wadahadalka waa in ay hoggaamiyaan oo ay maamulaan Soomaali. Iyadoo taageerada, ka-qeybgalka, iyo khibradda saaxiibbada caalamka lasoo dhaweynayo, lahaanshaha iyo masuuliyadda Soomaalida waa in la joogteeyo. Tani waxaa lagu billaabi karaa shir lagu qabto Muqdisho oo heerkiisu sarreeyo – kaasoo ka duwan shirarkii hore ee ay hormuudka ka ahaayeen beesha caalamka. In mudnaanta la siinayo doorka hay'adaha Soomaaliyeed waxay sidoo kale ku lug yeelan kartaa in lagu daro hababka Soomaalida ee nabad-raadinta inta uu socdo geeddiga wada-xaajoodka iyadoo tusaalooyin iyo talooyin lagasoo qaadanayo hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo xeerka.

3. **Tartiib-tartiib**: Arrimaha la rabo in laga hadlo waa kuwo la isku hayo, waxayna u baahan doonaan wakhti iyo gorgortan taxadar leh si looga gaaro heshiis. Wadahadalku wuxuu u baahan doonaa in si taxadar leh loo kala hormariyo. Tani waxay caawin doontaa in laga fogaado filashada in dhammaan arrimaha la isku hayo lagu xallin karo si degdeg ah iyadoo heshiisyada siyaasadeed la geeynayo heerar aan macquul ahayn. Waxa loo baahan doonaa in fiiro gaar ah loo yeesho hirgelinta heshiisyadan oo kale iyadoo Golaha Wadatashiga Qaranku uu lahaanayo doorkiisa muddada wada-xaajoodka oo dhan.

4. **Ka qeyb gal loo dhan yahay**: Iyadoo la tashiga dadweynuhu ay xoojinayaan talooyinka iyo fikradaha lagu gorfeynayo doodaha farsamada iyo siyaasadda, waxa kale oo muhiim ah in la hubiyo in xubnaha sida tooska ah uga qeyb galaya doodaha Golaha Wadatashiga Qaran ay ka tarjumayaan kala duwanaanshaha bulshada Soomaaliyeed. Tan waxaa lagu gaari karaa in la sameeyo kaalin ay cayaaraan wasaaradaha ay arrimahan khuseeyaan iyo hay'adaha kale ee metelaya haweenka, dhalinyarada, iyo beelaha la heyb-sooco. Waxa kale oo kamid noqon kara hubinta in xubnaha xogheynta Golaha Wadatashiga Qaran ay yihiin kuwo jinsi ahaan isku dheelli tiran.

5. **Sharciyeyn**: Sharciyeynta heshiisyada iyadoo loo marayo diyaarinta siyaasado, sharciyo, ama wax-ka-beddelka dastuurka waxay xoojin doontaa sharcinimada wada-xaajoodka. Haddii ay suurtogal tahay, heshiisyada siyaasadeed ee muhiimka ah waa in loo gudbiyaa wasaaradaha ay khuseeyaan ama guddiyada baarlamaanka si loogu beddelo sharci ama wax-ka-beddelka dastuurka si uu baarlamaanka u ansixiyo. Dhab ahaantii, tani waxay horseedi doontaa in si tartiib tartiib ah loo dhameystiro dib-u-eegista dastuurka.

6. **Waafajinta Dastuurka**: Hannaanka wada-hadallada waa in la waafajiyaa, illaa iyo inta suurtogalka ah, dastuurka Soomaaliya. Haddii ay suurtogal tahay, hay'adaha dowladda ee jira ama kuwa dastuuriga ah waa in ay dhammeystiraan oo ay taageeraan shaqada Golaha Wadatashiga Qaran, iyagoo ka fogaanaya isku-dhaca howlaha hay'adaha dowladda iyo dhismaha hay'ado cusub.

Arrimaha muhiimka ah ee wada-xaajoodka

Marka la eego arrimaha siyaasadda Soomaaliya ee lagu muransan yahay, wax-ay warbixintan ku talineysaa in arrimahaas loo kala saaro afar qeybood. Mid kasta oo ka mid ah afartan, kooxo gaar ah oo ay hoggaaminayaan Xogheynta Golaha Wadatashiga Qaran ayaa yeelan kara wada-xaajood heer-farsamo ah si loogu diyaariyo xulashooyin iyo talooyin hogaamiyayaasha GWQ iyadoo sidoo kale la sameynayo la tashi dadweyne. Waxa xusid mudan in arrimaha kale ee muhiimka ah sida xiriirka Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Somaliland, iyo wada-xaajood lala yeesho Al-Shabaab loo arko in ay ka baxsan yihiin hannaan-kan wada-hadalka, loona baahan yahay in si gaar ah loo wajaho.

Nashqada amniga

Horumar aan badneyn ayaa laga gaaray amniga, gaar ahaan fulinta heshiiskii hordhaca ahaa ee horraantii 2017 la gaaray ee u dhexeeyey madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad-goboleedyada ee Naqshadda Amniga Qa-ranka. Heshiiskan waxa uu dhaliyey in la caddeeyo arrimo muhiim ah, sida tira-da iyo qeybinta ciidamada amniga iyo talisyada iyo qaab-dhismeedka maamul ee dhexdooda ah. Habka diyaarinta naqshadda ayaa, sikastaba ha ahaatee, lagu dhaliilay inay ka maqneyd lahaanshaha Soomaalida, lamana dhaqan-ge-lin. Taa beddelkeeda, waxaa si weyn looga hadlay Qorshaha Kala-guurka ee Soomaaliya, kaasoo soo bandhigay istiraatijiyad ku aaddan jebinta Al-Shabaab iyo dib-u-qabsashada dhulka uu maamulo. Sikastaba ha ahaatee, qorshahaas ma aanu caddeynin qaab kale oo wax looga qabanayo arrimaha aasaasiga ah ee heshiiska arrimaha amniga.

Ciidamada ammaanka ayaa sidaas darteed ku kala qeybsamay heerar kala duwan ee dowladeed oo kala raacay kooxo siyaasadeed iyo qabiillo kala duwan. Tani waxay wiiqday awooddoodii ay ugu shaqeyn lahaayeen si wax-ku-ool ah waxayna mararka qaarkood keentay inay isku dhacaan cutubyo kala duwan. Wax-ka-qabashada arrintan ayaa ah mid si degdeg ah loogu baahan yahay, marka la eego hiigsiga cusub ee howlgalka Midowga Afrika ee ATMIS oo la filayo inuu bilaabo bixitaan tartiib tartiib ah saddexda sano ee soo socota iyo inuu ka baxo Soomaaliya oo dhan shanta sano ee soo socota.

Arrimaha ugu muhiimsan ee wada-xaajoodka amniga waxaa kamid ah:

- **Naqshadda Amniga Qaranka**: Marka la eego horumarka horey loo sameeyay, Naqshadda Amniga Qaranka ee hadda jirta weli waxa ay noqon kartaa meel fiican oo laga bilaabo wadahadalka. Laakiin, waxay u badan tahay inay u baahan doonto dib-u-qaabeyn iyo wada-xaajood kale, marka la eego ciidamada cusub iyo isticmaalka casharradii laga bartay tan iyo markii la ansixiyay. Wada-xaajoodyadu waxay u baahan doonaan in lagu caddeeyo qaab-dhismeedka taliska, dhameystirka u qeybinta ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo booliiska gobollo kala duwan, in la isla meel dhigo doorka ciidamada daraawiishta, iyo in la hubiyo in su'aalaha la xiriira in la awoodi karo la isla meel dhigo.

- **Qorshaha Kala-guurka Soomaaliyeed oo dib loo eego lana waafajiyo Naq-shadda Amniga Qaranka**: Nidaamka qorshaha kala-guurka ee hadda jira wuxuu leeyahay qorshe hawleed ku aaddan fulinta howlgallada militari ee ka dhanka ah Al-Shabaab, iyo wareejinta ATMIS ee masuuliyadda amniga oo lagu wareejinayo ciidamada amniga Soomaaliya. Kadib marka is-afgarad laga gaaro Naqshadda Amniga Qaranka ee dib loo eegay, waa in fiiro gaar

ah loo yeesho hubinta in qorshaha kala-guurla uu noqdo mid ku habboon oo la jaan qaadi kara Naqshadda Amniga Qaranka.

Wadaxaajoodyada heerka farsamada waxay u badan tahay inay u baahan doonaan ka qeyb galka jilayaasha iyo hay'adaha soo socda:

- Xafiiska La-taliyaha Amniga Qaranka
- Guddiga Isku-dhafka Ciidamada Qaranka, oo lagu heshiiyey qeybna ka ahaa heshiiskii amniga ee sanadkii 2017
- Wasaaradda Gaashaandhigga ee Dowladda Federaalka
- Wasaaradaha Amniga Gudaha ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Wasaaradaha Maaliyadda ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Guddiga Difaaca Baarlamaanka
- Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulka Gobollada, iyo Amniga ee Baarlamaanka
- Taliyayaasha sare ee ciidammada oo isugu jira kuwa heer federaal iyo heer dowlad-goboleed

Waxa kale oo muhiim noqon kara in la dhiso Guddiga Amniga Qaranka sida ku cad qodobka 111H ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 si ay u taageeraan geeddi-socodkan. Waa in si taxadar leh loo tixgeliyo waxtarka, wakhtiga iyo kharashyada la xiriira sameynta hay'ado cusub.

Qeybsiga awoodaha fulinta iyo garsoorka

Iyadoo dastuurka kumeelgaarka ah ee 2012 uu si cad u qeexayo qaadashada nidaamka federaalka Soomaaliya, haddana si buuxda looma go'aamin sida loo qeybsanayo awoodaha fulinta iyo garsoorka ee heerarka kala duwan ee dowladda. Mad-madowgani waxa uu ahaa isha khilaaf iyo is jiid-jiid joogto ah oo u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada dhowrkii sano ee lasoo dhaafay taasoo gacan ka geysatay burburka wada shaqeynta wax-ku-ool-ka ah ee heerarka kala duwan oo dowladeed. Arrin kale oo la xiriirta ayaa ah cadeyn la'aanta joogtada ah ee ku aaddan maqaamka caasimadda Muqdisho inkastoo awood iyo hanti badan ay taallo magaalada.

Isku dayada lagu xallinayo khilaafka u dhexeeya hay'adaha dowladda ayaa laga dhigay kuwo aad u adag iyadoo ay sii socoto caddayn la'aanta ku aaddan qaabka garsoorka Soomaaliya. Inkastoo qodobka 109 ee dastuurka kumeelgaarka ah uu xoogaa iftiiminayo, haddana is-afgarad ku saabsan xiriirka iyo awoodaha maxkamadaha heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ayaa weli ah mid mugdi ku jira. Waajibaadka Dastuuriga ah ee Golaha Adeegga Garsoorka ayaa ah mid iska hor imaanaya, taasoo keentay in shaki la geliyo xaaladda sharci ee guddigaas, iyadoo aan weli la dhisin maxkamadda dastuurka. Waxa sidoo kale mudan in la tixgeliyo in dib loogu noqdo qaab-dhismeedka hay'adda fulinta ee dowladda si looga fogaado taariikhdii hore ee xiisadda u dhexaysa madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha.

Arrimaha ugu muhiimsan ee wada-xaajoodka u baahan qeybtan waxaa kamid ah:

- **Qeybsiga awoodaha fulinta ee heerarka kala duwan ee dowladda**: Tani waxa ay u baahan doontaa in lagu heshiiyo masuuliyadaha dowladda oo ay yeelaneyso dowladda federaalka, kuwa dowlad-goboleedyada, iyo masuuliyadaha dowladaha hoose, iyo awoodaha wadaagga ah. Arrimaha ugu muhiimsan ee masuuliyadaha u baahan in laga wada xaajoodo waxaa kamid ah xiriirka dibadda, siyaasadda dhaqaalaha, maareynta kaabayaasha istiraatiijiga ah oo ay ku jiraan dekedaha iyo garoomada diyaaradaha, iyo bixinta adeegyada bulshada. Heshiis laga gaaro iyo sharciyeyn ku habboon ee arrimahan ayaa saldhig u noqon doona xiriir wax-ku-ool ah oo dhex mara madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada.

- **Maqaamka Muqdisho**: Xulashooyinka xalka u noqon kara maqaamka Muqdisho waxaa kamid ah in Muqdisho la hoos geeyo Dowladda Federaalka, in ay noqoto Dowlad-goboleed, iyo in ay noqoto caasimad ku dhex taalla Dowlad-goboleed. Waxaa muhiim ah marka la wada-xaajoonayo in laga heshiiyo sidii muwaadiniinta Muqdisho ku nool loo maamuli lahaa; sida loogu metelayo hay'adaha qaranka sida Aqalka Sare, iyo; sida loo maamulayo dakhliga kasoo xarooda magaalada. Sida arrinta maqaamka Muqdisho loo dhammeeyo waxay saameyn ballaaran ku yeelan doontaa nidaamka federaalka ee Soomaaliya, iyo doorka caasimadda ee ah astaanta midnimada qaranka.

- **Habka Garsoorka Soomaaliya**: Heshiis siyaasadeed oo ku saabsan hannaanka cadaaladda ayaa lagu saxiixay Jowhar bishii Janaayo 2018, heshiiskaasoo qeexayay hannaan federaal ah oo lagu dhisayo nidaamka garsoorka. Inkastoo la iska illoobay oo aan la fulin, haddana waxa uu heshiiskaas noqon karaa aasaaska wada-xaajoodyada cusub, inkastoo xulashooyin kale sida nooc garsoor mideysan ama mid labo-geesood ah weli la tixgelin karo. Doorka iyo dhismaha Guddiga Adeegga Garsoorka iyo maxkamadda dastuurka ayaa sidoo kale u baahan doona in la tixgeliyo.

Wadaxaajoodyada heerka farsamada waxay u badan tahay inay u baahan doonaan ka qeyb galka jilayaasha iyo hay'adaha soo socda:

- Wasaaradaha Arrimaha Dastuurka ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Wasaaradaha Cadaaladda ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
- Guddiga La-socodka Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee Baarlamaanka
- Guddiga Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ee Baarlamaanka
- Golaha Adeegga Garsoorka (marka laga heshiiyo xaaladdiisa sharci)

Federaaleynta maaliyadda iyo wadaagga kheyraadka

Hababka wadaagga dakhliga iyo kheyraadka ee u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda ayaa muhiim u ah go'aaminta heerka madax-bannaanida heerarka kala duwan ee dowladda, iyo rajada ballaaran ee horumarinta dhaqaalaha iyo bixinta adeeg hufan. Soomaaliya ayaa horumar muhiim ah ka sameysay dhinacan, iyadoo guulo ballaaran laga gaaray dib-u-habeynta maaliyadda iyadoo la raacayo hannaanka HIPC, oo ay ku jirto ansixinta Golaha Shacabka

(inkastoo aanu Aqalka Sare ansixin) ee Sharciga Maamulka Dakhliga sanadkii 2019 (kaasoo aasaas sharci siinaya is-waafajinta siyaasadda canshuuraha ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada); Xeerka Maareynta Maaliyadda Dowladda ee 2019 (oo aasaas u noqonaya maareynta miisaaniyadda, kharashaadka, iyo warbixinta heerarka kala duwan ee dowladda); iyo Sharciga Batroolka 2020 (oo aasaas u noqonaya hannaanka wadaagga dakhliga ee heerarka kala duwan ee dowladda). Sanadihii 2018 iyo 2019, waxaa laga gaaray heshiisyo kale oo muhiim ah bixinta shatiyada kalluumeysiga tuna iyo maamulka guud ee kalluumeysiga dalka, taasoo saldhig u ah qeybsiga dakhliga kasoo xarooda kammuuleysiga.

Sikastaba ha ahaatee, arrimo aasaasi u ah federaaleynta maaliyadda ayaan weli la qeexin. Awoodaha dakhli-ururinta waxaa lagu jaangooyaa dhulka la kala maamulo iyadoo ay Dowladda Federaalka kasoo uruurineyso canshuuraha gobolka Banaadir halka Dowlad-goboleedyadana ay dakhli kasoo uruuriyaan magaalooyinka waaweyn ee ay gacanta ku hayaan. Wareejinta maaliyadeed ee u dhexeysa Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ayaa ah mid inta badan ku saleysan mashaariic, mana xallineyso sinnaan la'aanta u dhexeysa Dowlad-goboleedyada. Heshiis ku saabsan habka rasmiga ah ee isku wareejinta maaliyadda waxaa cakiray yaraanta dhaqaalaha iyo kheyraadka ee dhammaan heerarka dowladda.

Arrimaha ugu muhiimsan ee wada-xaajoodka qeybtan waxaa kamid ah:

- **Qaabka loo qeybsanayo taageerada dibadda**: Taageerada dibadda ayaa muhiim u ah kabista hoos-u-dhaca weyn oo xagga dakhliga ah ee heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed, waxayna u badan tahay inay sii kororto sanadaha soo socda. Heshiisyo horudhac ah ayaa la gaarey laakiin lama hirgelin, sidaas darteed taageerada dibadda ayaa inta badan loo wadaagaa si aan rasmi ahayn oo aan halbeeg lagu heshiiyay ku saleysneyn. Sameynta iyo hirgelinta heshiisyada qeybsiga taageerada dibadda waa tallaabo muhiim ah oo loo qaadayo xoojinta xiriir wax-ku-ool ah ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.

- **Awoodaha dakhli-ururinta**: Awoodo dakhli-ururin ayaa loo baahan doonaa in loo qoondeeyo heerarka dowladda sida: lahaanshaha saldhig canshuur, dejinta qiimaha canshuuraha, maamulidda iyo ururinta canshuurta. Awoodahaas oo dhan waxaa la siin karaa hal heer oo dowladeed, ama waa la wadaagi karaa si sare loogu qaado wada shaqeynta. Marka la eego muhiimadda ay leedahay oo ah in ay tahay isha dakhliga dowladda, heshiis ku saabsan maaraynta canshuuraha kastamyada ee lagasoo xareeyo ganacsiga caalamiga ah ayaa si gaar ah muhiim u ah.

- **Hababka lagu go'aamiyo laguna hirgeliyo wareejinta maaliyadda:** hababka lagu go'aaminayo wareejinta maaliyadda ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed waxaa kamid noqon kara: tirada dadka ama qaacido laga wada xaajooday si loo maareeyo sinnaan la'aanta ka dhex jirta dowlad-goboleedyada; buuxinta gaabiska maaliyadeed ee miisaaniyadaha Dowlad-goboleedyada; ama bixinta lacago deeq ah oo shuruudo ku xeran ee fulinta siyaasadda dowadda federaalka.

- **Maareynta dakhliga laga helo soo-saarista kheyraadka dabiiciga ah**: Xeerka Batroolka iyo heshiisyada kalluumaysigu waxa ay aasaas u noqon karaan hab lagu wadaagayo dakhliga kasoo xarooda kheyraadka dabiiciga ah, inkastoo ay jirto is-afgarad la'aan ku saabsan mabaadi'da ay ku dhisan yihiin heshiisyadan iyo ka dhaqangelintooda dowlad-goboleedyada qaarkood. Heshiisyadan iyo kuwa kale ee kheyraadka wadaagga ah waxay u baahan doonaan fiiro gaar ah si loo hubiyo in si buuxda loo taageeray loona fuliyay.

Wadaxaajoodyada heerka farsamada waxay u badan tahay inay u baahan doonaan ka qeyb galka jilayaasha iyo hay'adaha soo socda:

- Wasaaradaha Maaliyadda ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Wasaaradaha Batroolka iyo Kheyraadka Dabiiciga ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada
- Guddiga Baarlamaanka ee Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Kormeerka Maaliyadda ee Hay'adaha Dowladda
- Guddiga Kheyraadka Dabiiciga ah iyo Deegaanka ee Baarlamaanka

Metelaadda hay'adaha dowladda iyo u tartanka awoodda

Metelaadda hay'adaha ayaa hadda ku saleysan hab-qeybsiga awoodda ee beelaha. Marka la eego heer qaran, nidaamka 4.5 waxaa lagu qeybsadaa kuraasta golaha shacabka ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya iyo golaha xukuumadda federaalka. Inkastoo dadka taageersan nidaamkan ay ku doodayaan in uu ka qeyb qaatay xasilloonida uuna ilaalinayo metelaadda kooxaha qaarkood, haddana waxa inta badan lagu dhaliilaa in laga saaray ama aan la metelin kooxo kale oo muhiim ah, oo ay ku jiraan haweenka iyo dhallinyarada, iyo in loo arko in aanu la jaan-qaadi karin nidaamka dimuqraadiga ah. Sidoo kale, dowlad-goboleedyada ayaa lagu dhisay heshiisyo awood qeybsi oo beelaha dega ayaa loo qoondeeyey kuraasta baarlamaanka iyo fulinta dowlad-goboleedyada, waxaana uu qabiilku go'aamiyaa meertada awoodda beelaha ee xilalka muhiimka ah, sida madaxtooyada. Dowlad-goboleedyada waxay wajahaan dhaleecayn lamid ah nidaamka 4.5. Sidaas darteed, waxaa mudnaan u ah Soomaali badan in ay ku heshiiyaan habab lagu dhimayo doorka awood-qeybsiga qabiilka ee siyaasadda.

Inkastoo la ansixiyey sharciga doorashooyinka qaranka sanadkii 2020, lana sameeyay sharciga xisbiyada siyaasadda sanadkii 2016, tartanka awoodaha ayaa inta badan lagu maareeyaa qaab doorasho dadban oo kursi kasta oo ka tirsan golaha shacabka waxa uu leeyahay metelaad go'an oo gaar ah oo qabiil ama jufo. Heer qaran iyo heer dowlad-goboleedba, nidaamyadan ayaa lagu dhaliilay in ay dhaliyeen faragelin siyaasadeed oo xad-dhaaf ah, cod-iibsasho, iyo in saaxadda laga saaro kooxo muhiim ah sida haweenka. Heer qaran, dadaallada lagu doonayay in looga heshiiyo qaab doorasho oo habboon ayaa sidoo kale ahaa isha ugu weyn ee xasillooni-darrada. Marka la eego heerka dowlad-goboleed, doorashooyinku waxay sidoo kale muujiyeen khilaaf iyo kicin, iska-horimaadyo gacan-ka-hadal ah, iyo xiisado siyaasadeed oo daba dheeraaday, iyo sidoo kale in uu xumaado xiriirka kala dhexeeya dowladda federaalka.

Arrimaha ugu muhiimsan ee wada-xaajoodka qeybtan waxaa kamid ah:

- **Noocyo cusub ee doorashooyinka qaranka**: Soomaalidu waxa ay u baahan doontaa in ay ku heshiiyaan hannaanka doorasho ee federaalka ah ee sanadka 2026. Tani waxay la macno tahay in lagu heshiiyo qaab doorasho toos ah oo si dhab ah loo hirgelin karo; dejinta hab doorasho dadban oo la xoojiyey kaasoo yareynaya ceebaha hanaankii hore; ama nooc isku-dhafan oo ay qeyb ka wada yihiin astaabaha doorasho toos ah iyo mid dadban.
- **Doorashooyinka heer dowlad-goboleed**: Waxa loo baahan yahay in fiiro gaar ah loo yeesho heshiisyada ay ku dhisan yihiin dowlad-goboleedyada si loo taageero hannaan doorasho ee dowlad-goboleedyada ah oo heshiis lagu yahay oo ka fogaan kara isku-dhac, aasaas wanaagsanna u noqon kara dib-u-habeyn ballaaran in lagu sameeyo. Habka wada-xaajoodka heer qaran waxa uu fududeyn karaa in ay soo baxaan habab wada-xaajood oo heer

dawlad-goboleed ah oo wax ka qaban kara arrimaha ku xeeran awood-qeybsiga iyo qaababka doorashada. Mustaqbalka fog, nidaamyadan heer dowlad-goboleed waxay wax ka qaban karaan arrimo ballaaran sida maamulka maaliyadda, qaabeynta ciidamada amniga ee heer dowlad-goboleed, dib-u-heshiisiinta bulshada iyo maareynta colaadaha la xiriira dhulka. Tan waxa kale oo kamid noqon kara xoojinta dowladaha hoose iyo isla-xisaabtanka iyadoo loo marayo hirgelinta Hannaanka Wadajir (Wadajir Framwork).

- **Doorashooyinka dowladaha hoose**: Kadib guulihii laga gaaray doorashooyinkii tooska ahaa ee ka dhacay qaar kamid ah degmooyinka Puntland, waxaa jirta fursad kor loogu qaadi karo baaxadda doorashooyinka dowladaha hoose oo lagu qabto meelo kale oo dalka kamid ah. Hannaan la is waafajiyay ee doorashooyinka heer degmo ee dalka oo dhan ah, laguna qeexay sharciyada dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ayaa noqon kara horumar la taaban karo oo laga gaaray geeddi-socodka dimuqraadiyeynta Soomaaliya.

Wadaxaajoodyada heerka farsamada waxay u badan tahay inay u baahan doonaan ka qeyb galka jilayaasha iyo hay'adaha soo socda:

- Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dowladda Federaalka
- Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad-goboleedyada
- Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka
- Guddiga Baarlamaanka ee Arrimaha Gudaha, Maamulka Gobollada iyo Amniga

Kala hormarinta iyo isku xijinta

Dhammaan arrimaha kor ku xusan si buuxda looguma xallin karo hal muddo-xileed. Qaar badan ayaa la xiriira arrimo muddo dheer soo jiitamayay oo lagu muransanaa xilliyadii hore ee colaadaha iyo burburka dowladeed ee daba dheeraaday. Isku dayga in lagu xalliyo arrimo badan hal mar waxa laga yaabaa in ay culeys ku noqoto xaaladda siyaasadda oo ay xitaa kiciso xasillooni darro. Iyadoo taas maanka lagu hayo, waxaa lama huraan u noqon doonta hoggaamiyeyaasha Soomaalida inay mudnaanta siiyaan arrimahan si loo kordhiyo fursadaha horumar la taaban karo oo waara looga gaaro arrimahan. Qaar kamid ah kala hormarinta isku xijinta la sameyn karo waxaa kamid ah:

- **Mudnaanta 1-aad**: **Dhamaystirka naqshadda amniga:** Horumarrada laga sameeyo hay'adaha ammaanku waxay wax ka beddelayaan nolosha muwaadiniinta Soomaaliyeed. Laamaha ammaanku waxay sidoo kale ilaa hadda yihiin kuwa kharashka ugu badan ay ku bixiso dowladda Soomaaliya. Haddii dib-u-eegis lagu sameeyo Naqshadda Amniga Qaranka, hoggaamiyayaasha siyaasadda waxay fursad u helayaan in ay guulo la taaban karo ka gaaraan amniga dalka, iyagoo sidoo kale dejinaya hannaanka qeybinta masuuliyadda iyo kharashaadka taasoo dhalin karta wadahadal dheeraad ah oo ku saabsan qeybsiga awoodaha hay'adaha fulinta iyo garsoorka iyo sidoo kale federaaleynta maaliyadda iyo wadaagga kheyraadka.

- **Mudnaanta 2-aad: In la go'aamiyo qeybsiga awoodaha fulinta ee nidaamka federaalka:** Kala caddeynta qeybsiga awoodaha fulinta waxa ay ka dhigan tahay guul muhiim ah ee dhisidda nidaam federaal oo shaqeynaya. Tan waxa la sameyn karaa kadib marka laga wada xaajoodo Naqshadda Amniga Qaranka. Iyadoo xallinta maqaamka Muqdisho ay muhiim tahay, ayaa haddana hannaan kumeelgaar ah loo sameyn karaa marka la eego awood qeybsiga, masuuliyadda maaliyadeed, iyo metelaadda hay'adaha si arrinta maqaamka Muqdisho loo dhammeeyo wakhti dambe. Marka la eego nidaamka garsoorka, qaabka lagu heshiiyey magaalada Jowhar 2018 waxa uu noqon karaa hab kumeelgaar ah oo la isticmaalo wakhtiga dhaw inta diiradda la saarayo arrimaha kale. Sidoo kale, dhismaha Maxkamadda Dastuurka looma baahna in mudnaan gaar ah la siiyo haddii lagu heshiiyo, tusaale ahaan, Maxkamadda Sare in ay shaqadeeda sii qabato si kumeelgaar ah.

- **Mudnaanta 3-aad: In lagu heshiiyo hab rasmi ah oo lagu wadaago taageerada dibadda:** Horumarka laga gaaray amniga iyo qeybinta awoodaha fulinta waxay siinaysaa aasaas adag oo lagu go'aamiyo dhinacyada muhiimka ah ee federaaleynta maaliyadda. Diiradda in marka hore la saaro qeybsiga taageerada dibadda ayaa laga yaabaa inay noqoto meesha ugu macquulsan ee wax laga billaabo, waxayna xal u noqon kartaa sinnaan la'aanta dakhliga gudaha ee Dowlad-goboleedyada, iyadoo la dhisayo kalsoonida Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada. Marka la helo kalsooni xooggan oo u dhexeysa hoggaanka siyaasadda, diiradda ayaa markaas loo weecin karaa hab tartiib tartiib ah oo looga heshiinayo wadaagga dakhliga kasoo xarooda ganacsiga caalamiga ah, kheyraadka dabiiciga ah ee dalka iyo meelaha kale ee uu dakhliga kasoo xaroodo.

- **Mudnaanta 4-aad: Xoojinta dimuqraadiyeynta:** Tani waxay ka bilaabmi kartaa in lagu heshiiyo dhisidda xisbiyada siyaasadda, iyadoo wax laga beddelayo sharciga xisbiyada siyaasadda si loo sameeyo diiwaangelin rasmi ah, iyadoo aan loo eegeyin nidaamka doorashada. Waxaa jira hababb dhowr ah oo la isticmaali karo si loo horumariyo hannaanka dimoqraadiyadda iyo nidaamyada doorashada ee Soomaaliya:

    a. **Mudnaansiinta hirgelinta doorashooyinka dowladaha hoose**: Tani waxay u baahaneysaa dejinta istaraatiijiyad heer qaran ee doorashada dowladaha hoose ah waxaana kamid noqon kara qabashada doora-

shooyinka dowladaha hoose ee gobolka Banaadir iyo qaar kamid ah caasimadaha gobollada. Tani waxaa laba baran doonaa casharo muhiim ah oo ku aaddan doorashada qaran ee mustaqbalka. Doorashooyinka qaranka, madaxdu waxay ku heshiin karaan sanadka ugu horreeya ee maamulka cusub ee federaalka in qaab doorasho dadban loo isticmaalo doorashada 2026, iyadoo la adeegsanayo casharradii laga bartay la-badii doorasho ee u dambeeyay si loo yareeyo faragelinta siyaasadeed loona xaqiijiyo in uu hannaanka noqdo mid lagu kalsoonaan karo.

b. **Mudnaan-siinta hirgelinta doorashooyinka qaranka oo ku saleysan codeyn toos ah:** Si taas loo gaaro waxaa laga yaabaa inay muhiim tahay in la tixgeliyo qaababka doorashada isku-dhafka ah, oo ay ku jirto doo-rasho qof iyo cod ah, laakiin laga yaabo inay sidoo kale qeyb ka noqoto habka awood qeybsiga beelaha iyo hababka kale ee doorashada aan tooska ahayn. Hannaan waaqici ah sida habkan oo kale waxay kord-hin kartaa suurtogalnimada in lagu guuleysto sidoo kalena la yaraayo khatarta isku dhaca. Isku day kasta oo noocan oo kale ah, sikastaba ha ahaatee, waa in ay la socdaan waqtiyo macquul ah oo ay tahay in la fuliyo, kuwaasoo, haddii aan la sameynin, saldhig wakhti hore u noqon kara qaadashada habka doorashada dadban, iyadoo casharro laga baranayo xilli-siyaasadeedkii hore.

c. **In diiradda la saaro arrimaha kale iyo dib ugu noqoshada nooca doo-rashada marka horumar la sameeyo**. Haddii horumar laga sameeyo dhinacyada kale, nooca doorashadu waxay u badan tahay inay noqon doonto mid aan la isku khilaafin. Sikastaba ha ahaatee, tani waxay si weyn u dhimi doontaa fursadaha in ay Soomaaliya ka dhacdo doorasho toos ah, maadaama u diyaargarowga arrintani uu billaaban karo sanada-ha dambe ee muddo-xileedka dowladda, markaasoo ay u badan tahay inay aad uga daahday hirgelinta hannaan doorasho toos ah sanadka 2026-ka.

- **Mudnaanta 5-aad: Ka shaqeynta hannaan doorasho dowlad-goboleedya-da ah oo heshiis lagu yahay**: Waxaa muhiim u noqon doono geeddi-socodka wada-xaajoodka qaran in xilli hore la gaaro heshiisyo ku saabsan qabashada doorashooyinka dowlad-goboleedyada si looga fogaado burbur ku yimaada xiriirka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, taasoo wiiqi karta horumar laga sameeyo arrimaha muhiimka ah. Tan waxaa lagu suurtagelin karaa iyadoo la mideynayo jadwalka doorashooyinka dowlad-goboleedyada oo dhan.

Xuquuq

Faalladan qotada-dheer waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dia-logue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and De-velopment Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaa-bilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta si-yaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeed-ka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. Somali Public Agenda waxa ay wa-dashaqeyn la leedahay Somali Dialogue Platform.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo ho-rumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).